Qaybta Neerfaha caruurta
Sebteembar 2019

Warbixinta bukaanka

Habkee loo dhigay ilmaha qaybta?
Waxaa loo dhigay in mudo dheer lagu kontoroolo EEG

Maxay tahay sababta loo dhigay ilmaha isbitaalka?
Waxay noqon kartaa sababo badan in la dhigo ilmaha qaybta EMU. Bukaanka qaar waxaa laga baaraa in la hubsado, inay qabaan qalalka iyo in kale. Bukaanka qaar waxaa laga baaraa in la ogaado nooca qalalka ay qabaan, iyo in qalalka ay qabaan u baahan yahay qalitaan. Bukaanka waxaa la kontoroolayaa nidaamka hurdadooda. Taasina waa sababta loo isticmaalayo habab kala duwan oo elektroonik ah. Si loola socdo, ilamaha waa inay joogaan sariirtooda mar walbaa habeenkii.

Siddee ayaan u diyaar garoobaa?
Tinta ilmaha waa in la maydhaa oo la qalijayaa. Waqtiga baaritaanka waxay qaadan kartaa ilaa shan cisho. Ilmaha ma awoodi doono in loo maydho ama maydho inta baadhitaanku socdo. Si kastaba ha ahaatee, waxay heli karaan in xoogaa yar la nadnadiifiyo, laakiin tinta lama taaban karo.

Waxaa muhiim ah in ilmaha loo xidho dhar jilicsan. sida dharka orodka ama isboortiga, waayo elektariga waxaa lagu xidhayaa jirkiisa. Ilmaha waxa khasab ah in loo xidho dhar badhano/jiinyeer ku leh xagga hore, waayo suurtagal ma noqonayso in dharka looga bixiyo madaxmadax marka qalabka lagu xidho. Haddii loo baahdo, shaadhadh waxaa laga amaahan karaa qaybta.

Maxaa lala imaan karaa
Waa khasab inaad usoo qaado daawada ilmaha, taasoo uu u baahan yahay in la siiyo inta baadhitaanku socdo, waxaadna kusoo qaadaysaa baakadkeeda saxda ah. Si kastaba ha ahaatee, waxay noqon kartaa lagama maarmaan in wax laga bedelo daawaynta inta baadhitaanku socdo, tanina waxaa kaala hadlaya dhakhtar inta lagu jiro shaqo maalmeedka. Waa fikrad aad u fiican, inaad soo qaadato waxyaabaha la akhristo, waxyaabaha gacanta laga sameyo, DVD/kumbiyuutar, iwm. Moobaaylada waa la ogol yahay, laakiin waxaa kaliya oo lagu isticmaali karaa qolka bukaanka.

Maxaan lal imaan karin
Ilmaha looma ogala inuu ruugo xanjo, inta uu ku jiro qaybta, waayo waxay waxyeelayn kartaa EEG. Ma lahan Wi-Fi qaybta EMU, waayo waxay waxyeelaynaysaa shaqada EEG. Waa laguu ogol yahay inaad isticmaasho interneetka moobaaylkaada. Waxaa yaala kumbiyuutar interneet leh qololka maalintii, oo bukaanku isticmaali karaan maalintii

Sigaar cabida

Sigaar laguma cabi karo gudaha, laakiin waa suurtagal inaad dibada u baxda meelaha lagu cabo sigaarka ee raacsan qawaaniinta sigaar cabida ee qaybta.

Booqashada
Waa la ogol yahay booqashada EMU, laakiin waxaa khasab ah in lala socodsiiyo shaqaalaha ka hor booqashada. Haddii dadku ka badan yihiin hal qof, waa in la fadhiistaa qolka maalintii. Waxaan idinkula talinaynaa inay booqashadiinu yaraato, inta aad kartaan. Waa suurtagal inaad soo booqon karto EMU, ka hor inta aan ilmah la dhigin. Tani waxaad kala baaran degi kartaa qaybta caruurta.

Habkee ayaa loo samaynayaa baadhitaanka?
Ilmaha waxaa lagaga xidhayaa meelo badan oo jirkiisa ka mid ah iyo madaxa qalab elekroonig ah. Marka lagu xidho qalabka elektarooniga ah, waxaa bilaamaya in la rekoord gareeyo, oo waxay soconaysaa 24 saac. Sidoo kale waxaan kala soconaynaa ilmaha shaashad fiidiyow ah.
Kaamarooyinka waxay ku xidhan yahay meelo badan oo qaybta ka mid ah, hoolka wayn iyo qolalka maalinta la isticmaalo. Wax kaamaro ah kuma xidhna musqaulaha.

Cunto
Cuntada waxaa la bixiyaa sadex mar maalintii. Intaa waxaa dheer, in doolsho la bixiyo galabtii. Waa suurtagal in la samaysan karo kafee ama shaah,...iwm. Cuntada waa u lacag la'aan qoyska la socda ilmaha. Qaraabada kale waa inay la yimaadaan cuntadooda. Waad dalban kartaa cunto khaas ah. Fadlan u sheeg shaqaalaha haddaad dalbanayso cunto khaas ah, ka hor inta aan lagu dhigin.

Deegaanka
Caruurta waa loo ogol yahay in waalidka la seexdo qolalka qaybta EMU. Haddii ilmaha ay la socdaan in ka badan hal waalid, waxaa suurtagal ah inaad qol ka kiraysan karto hoteelka Comwell Sorø. Kala xidhiidh Cuntada & Kulamada teleefankan 58 27 12 03 si aad xajis u samaysato.

Waa muhiim inaad nala socodsiiso suuxdimaha:
Haddi ilmah uu dareemayo inuu suuxayo ama uu xoogaa ka hor suuxay, waa muhiim inaad u sheegtaan shaqaalah. Kor oogu hadal makarafoonka, oo ku sheeg waxa uu dareemayo ilmaha ama uu sheegayo, ama taabo badhan ka mid ah badhamada qalabka. Haddii aad tahay waalid la socda ilmaha, sida badan waa shaqadaada inaad isha ku hayso suuxdimada ilamaha, isla markaana waa inaad sheegto.

Shaqaalah Qayba EMU
Waxaa jooga shaqaale qaybta EMU 24-ka saac maalin walba. Shaqaalaha waxay ka

kooban yihiin kalkaaliyaasha neerfaha iyo kalkaaliyaal caafimaad.

Kormeerka iyo jawaabaha:
Kormeerka waxaa sameeya la taliyaasha qaybta EMU. Khasab ma ha inuu la taliyahu yahay mid aad horay oogula kulantay qaybta qalalka ee caruurta. Kooxda shaqaalha EMU waxay qiimaynayaan si maalinla ha haddii ujeedkii dhigataanka qaybta la gaadhay. Natiijada baadhitaanka islamarkaaba laguma siinayo. Waxaa laguu sheegayaa natiijada kadib marka qayb laguu xawilo.

Baadhitaanka kadib:
Marka lasoo afjaro baadhitaanka, ilmaha waxaa loo gudbinayaa qaybta caruurta qalalka leh ama waa laga saarayaa isbitaalka. Waxaan ku waydiisnaynaa ogolaanshahaaga, haddii aan isticmaali karo duubitaankii laga sameeyay ilmaha – taasoo ka mid ah rekoordka daawada ilmaha – in loo isticmaali karo shirarka caafimaadka. Ogolaanshahan waa inuu noqdaan mid qoraal ah, waxaan la adkaynayaa in kaliya rekoordkan loo isticmaali karo shirarka cilmiga ah, oo aan loo isticmaali karin siyaabo guud oo kale.

Xaqaa'iq
Goobta:
Baadhitaanka waxaa uu ka dhacayaa isbitaalka "EMU" (Waaxda La socodka Qalalka) ee raacsan qaybta neerfaha. Qaybta EMU waa qayb ka kooban adar waaxood oo leh musqalaha qabayska iyo musqalaha caadiga ah, qolka maalita la isticmaalo, qolka cuntada, qolka ciyaarta iyo meesha kumbiyuutarka.

Waxaad ka akhrin karta xuquuqda bukaanka halkan www.filadelfia.dk/patienter Sidoo kale, way kuu furan tahay inaad na amaani karto, naga dacwoon karto ama aad aragti noo soo gudbin karto. Waxaad tani ku samayn kartaa inaad noogu soo dirto email filadelfia@filadelfia@filadelfia.dk – fadlan ku qor cinwaanka "til EMU".